

SHARCIGA LACAGTA DUGSIGA DEGMADA EE MAGAALADA SALT LAKE IYO MURAAJACEYNTA QIIMO DHIMISTA

HADDII AAD CAAWIMAAD KUSAABSAN SIDAAD U FAHMI LAHAYD OGEYSIISKAAN AAD DOONEYSO, FADLAN LAXARIIR BOB MUENCH at (801) 578-8378.

Habraacaan waxaa loo qoray si aad u fahanto hagaha sharciyada dugsiga magaalada Salt Lake iyo habraaca kusaabsan qiimo dhimista iyo cida uqalmata.

Dulmarka

1. Sharciga Utah waxa uu ogolaanayaa in lacagta dugsiga lagu jaangooyo fasalka todabaad illaa labo iyo tobanaad. Tani waxay lamicno tahay in ardayga lagu qoraayo lacagta dugsiga ee loogu talagalay qalabyada, walxaha, nashaadaadka, iyo barnaamijyada.
2. Dhamaan lacagta dugsiga waxaa lagu saleenayaa qiimo dhimis.
3. Dhamaan ardayda laga diiday codsiga qiimo dhimista waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan racfaan.

Sharciga Dugsiga Degmada ee Kusalaysan Qiimo dhimista

Guddigga Waxbarashada Dugsiga Degmada ee Magaalada Salt Lake waxay ansixiyeen nidaamka dhimista lacagta iyo jadwalka khidmadda iyadoo la raacayo sharciga gobolka. Sharciga, habraacyada, iyo jadwalka lacagta dugsiga waxaa laga helaa bogga webseedka degmada ee ah:

<https://www.slcschools.org/board-of-education/board-policies> - qaybta hoose ee bogga u deg raadina S-10: Khidmadaha Ardayda iyo Ka dhaafida Khidmadaha.

Habka Qiimo Dhimista

Dugsi kasta wuxuu leeyahay maamule qaabilsan dhaafitaanka khidmada oo dib-u eegis ku sameeya go'aana ka gaara codsiyada dhaafitaanka lacagaha dugsiga. Webseedka dugsigaaga ama xaafiiska shaqaale ee soo dhaweynta ayaa ku siin kara meelaha aad kala xariiri karto maamulaha qaabilsan dhaafitaanka lacagaha dugsigaaga. Degmadu waxay awooda saaraysaa siday u xaqiijin lahayd in habka loo helaayo qiimo dhimista ay tahay mid daacad ah, fudud oo aan lahayn waqti dhumis. Sidoo kale, degmadu waxay badanaa isku daydaa inay xakameyso takoorka, dhebaateenta, feejig la'aanta, iyo caqabadaha aan habbooneyn ee kudhaca ardayda iyo waalidiinta. Nidaamku ma lahan tilmaamo la arki karo oo qofkasta uu aqoonsan karo codsabayaasha qiimo dhimista, iyo ardayda degmada (oo aan ahayn ardayga qoyskiisa/waalidku codsanaaya) looma oggola in laga caawiyo nidaamka codsiga. Macluumaadka qoysaska/waalidiinta waxaa laga dhigiyaa mid gabi ahaaba qarsoodi ah inta lagu jiro nidaamkaan.

Sidoo kale, fadlan ogsoonow in ardayda helaysa lacag dhimista aan loola dhaqmeen si kaduwan sida loona dhaqmo ardayda kale, lagamana aqoonsan karo ardayda kale, shaqaalaha, ama qof kale doonaya inuu ogaado macluumaadkaas.

Habka Qiimo Dhimista

Ardayga waxaa u qalmaa qiimo dhimista haddii:

1. ardayga uu u qalmo inuu helo qado bilaash ah oo ay bixiso USDA.
2. Ardayga uu helo SSI

3. qoyska ardayga ay helaan TANK
4. ardayga uu helo daryeel gaar ah, ama
5. ardayga uu kujiro xaalad gaar ah

Intaas waxaa dheer, haddii aad lakulantay xaalad dhaqaalo xumo oo ay sababeen shaqada oo ka tagtay, xanuun xun oo aad qabto, xaalad kale oo gacantaada ka baxsan, markaas cunugaaga waxa uu uqalmi karaa qiimo dhimis xataa haddii shuruudaha kale aan la buuxin. Xataa haddii ardaygu uusan u qalmin shuruudahaas, waxaa qasab ah in dugsiga uu siiyo qiimo dhimis haddii lacagta la dulsaaraayo ardayga ay kahor istaagayso fursadaha uu si buuxda oga qaybgalaayo ama uu ku dhamaystiraayo sababo laxariira in uusan awoodin bixinta lacagta dugsiga.

Hase yeeshee, si aad ugu qalantid lacag dhimista, dugsiga waxaa qasab ah in helo DUKUMIINTIGA si loo hubiyo uqalmida ardayga. Waa qasab in aad dhamaystirto codsiga qiimo dhimista aadna usoo gudbisoo maamulaha si uu ugu sameeyo dulmar una ansixiyo. Codsiga waxaa laga heli karaa xaafiiska guud ee dugsiga iyo webseetka Guddiga Waxbarashada Gobalka Utah oo ah:

<https://www.schools.utah.gov/schoolfees?mid=4340&tid=3>. Isla marka aad soodirtid foomka codsiga, bixinta lacagta dugsiga waxaa la joojinayaa illaa iyo inta laga gaaraayo go'aan kusaabsan uqalmida ardaygaaga ee qiimo dhimista dugsiga. Haddii codsiga la diido, dugsiga waxa uu kusoo dirayaa Go'aanka iyo Foomka Racfaanka. Foomka waxaa lagu sheegayaa sababta codsigaaga loo diiday waxa uuna sharaxayaa racfaanka go'aanka. Haddii racfaanka qiimo dhimista la diido, uma baahnid inaad bixisid lacag illaa racfaanka laga gaaro go'aan.

Haddii ardayga uu uqalmo qiimo dhimis, dhamaan lacagta dugsiga waa in lagu sameeyaa qiimo dhimis, oo ay kujirto – laakiin aan ku ekeen – kuwaan soosocda:

Kharashaadka isdiiwaangelinta, buugaagta dugsiga, buugaga iyo carbuunta agabka, qalabyada dugsiga, kaararka shaqada, hawlaha kabaxsan manhajka, iyo kuraasta dugsiga; kharashaadka laabka iyo dukaanka; kharashaadka geemka iyo shukumaanka; lacagaha yunifoomka iyo qalabyada; kharashaadka kooxaha iyo safarada banaanka; lacagaha safarada kooxda iyo fasalka; lacagaha qalabka muusikada ee loogu talagalay in loo isticmaalo nashaadaadka iyo fasalada dugsiga.

Majiraan waxa la yiraahdo lacagta “non-waivable” or “optional” (Qiimo dhimista aan lahayn or ikhtiyaariga ah), laakiin waxyaabaha kale ee lagu beddeli karo qiimo dhimista ayaa mararka qaarkood loo diyaarin karaa, laakiin looma isticmaali karo lacagta buugaagta. Dugsiga kuma waydiin karo inaad lacagta qayb-qayb u bixisid, IOUs, ama qorshayaasha kale ee kusaabsan dib u dhigista lacagta haddii aad u qalanto in lagaa dhaafdo lacagta dugsiga.

Lacagta loogu talagalay beelka fasalka, buugaagta sanadka, sawirada dugsiga, jaakadaha fudud, iyo waxyaaha kale ee lamidka ah kuma jiraan lacagta dugsiga wax qiimo dhimis ah laguma sameenaayo. Sidoo kale, haddii ardaygaaga uu dhumiyo ama wax garaafo ah u gaysto alaabaha dugsiga, lacagta lagu sameenaayo ama lagu badelaayo laguma daro lacagta dugsiga iyo mida ladhimo. Ardayda waxaa laga rabi karaa inay bixiyaan lacagta iska qorista dugsiga ama lacagta ku baxda koorso badelka. Qaybta lacagta laxiriirta buundooyinka kulliyada ama darajooyinka dugsiga sare kadib ama dhibcaha kuma xirna qiimo dhimis. Sidaas daraadeed, kaliya ardayda bixisa lacagta buugaagta dugsiga ama qalabka waxay u qalmaan inay helaan qiimo celin marka sanadku dhamaado.

Dugsiga iyo shaqaalaha dugsiga iskama celin karaan, mana yareen karaan, mana horumarin karaan buundooyinka ama dhibcaha, ama ma hakin karaan buundooyinka, dalacsiinta, kaararka warbixinta, dukumiintiyada, ama dibloomooyinka si loo xoojiyo bixinta lacagta dugsiga. Dugsiga waxa uu kaydiyaa

diiwaanka rasmiga ah ee ardayga u sameeya alaab lumista ama burburka alaabaha; hase yeeshee, waxaa laga yaabaa inaysan hayn diiwaanada ardayga ee ka horjoogsanaya ardayga inuu dugsiga tago ama in si habboon dugsiga loogu meeleeyo.

Dukumiintiyada qiimo dhimista waxaa laga yabaa INAAN loo baahan sandka kasta laakiin waxaa la iska rabi karaa markasta oo dugsiga ama waalidka ay u baahdaan dulmar kusaabsan dib u eegista. Sidoo kale, dukumiintiga waa INUUSAN dugsigu u kaydin sababo laxariira Ammaanka. Dugsiyadu waxaa laga yaabaa inay gudbiyaan macluumaadka kusaabsan qiimo dhimista una gudbiyaan dugsiga kale ee ardaygu kasii wato waxbarashadiisa uuna u wareegsado.

Haddii aad qabtid wax su'aal ah, marka koowaad la hadal maamulaha dugsigaaga ee qaabilsan dhaafitaanka lacagta dugsiga ama wakiilka kasocda dugsiga lagu xusay hoos:

Waaxda Natijada iyo Hogaanka Dugsiga (801) 578-8350

Haddii aad jeclaan lahayd inaad koobi gareeysid dhamaystirtidna habraaca degmada ee kusaabsan lacagta dugsiga, fadlan laxariir Bob Muench at (801) 578-8378.